

Dadka weyn waxay u baahanyihiin tallaadada xoojinta toban sanno ee walba

Ma ahan in dhammaan tallaalada naloo siiyay sida carruurta ka hortaga noolaanshaha fog. Dadka weyn waa inay qaataan ka hortaga tallaalka gawracatada, teetanada, xiiqdheerta iyo dabeysha toban sanno ee walba.

Tallada waxay quseysaa dhammaan dadka weyn, ma ahan kaliya kuwa raba inay safraan.

Muhiimada dib u tallaalida

Machadka Noorweyaanka ee Caafimaadka Bulshada waxay ku taliyeen xoojinta garoojada tallaalka ka soo horjeedo gawracatada, teetanada, xiiqdheerta (qofaca xiiqdheerta) iyo dabeysha qiyaastii toban sanno ee walba, ma ahan kaliya hubinta illaalada shaqsiga laakin si loo joogteeyo difaac sareeyo oo bulshada. Markii inta badan dadka ay ka illaalsanyihiin cudur, difaaca ka hortaga ayaa la gaaraa ee ka hortagtaa kuwaas aan tallaalneyn. Iyo ka hortaga tallaalka hooseeyo, cudurada hadeer ku daboolan Noorwey (sida dabeysha iyo gawracatada) way soo laaban karaan.

Miyaadan hubin haddii aad rabtid garoojada xoojiyaha?

Ka gal adeega tallaalka ee helsenorge.no (noorweyaan) si loo hubiyo heerka tallaalka ee adiga iyo carruurtaada ka hooseeyo 16 sanno. Xarunta caafimaadka bulshada, Dhagtarkaaga (GP) ama xarunta caafimaadka tallaalka wuxuu ogeysiinayaa Diiwaanka Tallaalka Noorweyaanka SYSVAK ee tallaalka lagu bixiyo Noorwey sida qeyb ka ah Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada. Ogolaanshaha waxaa looga baahanyahay in la diiwaaniyo tallaalada laga siiyay meel ka baxsan barnaamijka.

Xiriirka GP ama xarunta caafimaadka tallaalka safarka si loo diyaariyo balan.